



Federal Republic of Somalia
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation
Office of the Minister

Tix: WAGF&D/XW/064/19

Tar: 17/07/2019

Dhismaha Guddiga Qabangaabada Shirkyawnahe

Dib-u-Heshiisiinta Galmudug

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta,

Markuu dhegastey: Talo bixinta mas'uuliyiinta Galmudug ku matila golayaasha qaranka ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed, dhaqanka, culimmada, waxgaradka iyo dhammaan bulshada reer Galmudug

Markuu arkay: Baahida too qabo dib-u-heshiisiin iyo isu soo dhowayn dhex marta shacabka Galmudug si loogu diyaariyo inay wada dhistaan maamul dawlad goboleed oo ay u dhan yihii

Markuu tixgeliyey: Heshiisyadii siyaasadeed oo ay wada gaareen Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka Galmudug

Isagoo ku baraarugsan: In la joogo waqtigii la dhisi lahaa maamul dawlad goboleed Galmudug oo beddela maamulka hadda waqtigiisu dhammaaday

Isagoo dareensan: khatarta amni iyo mappa maamul ee shacabka Galmudug soo wajihikarta haddii waqtigan xasaasiga ah aan Galmudug dhisan maamul la isku raacsan yahay

Wasiirku wuxuu go'aamiyey:

Qodobka 1aad

Dhisidda Guddi Qabangaabo

In la dhiso Guddiga Qabangaabada Shirkyawnahe dib-u-heshiisiineed oo ay ka qayb galaan dhammaan beelaha wada dega Galmudug. Fadhiga Shirku waxuu noqonayaa magaala madaxda DGGM ee Dhuusa-Marreeb.

Qodobka 2aad

Tirada Xubnaha Guddiga iyo Guddoonka

Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa 12 xubnood oo ka kala socda beelaha deggan Dawlad Goboleedka Galmudug. Marka la soo dhammaystiro xubnaha guddigu waxay iska dhix dooranayaan (1) Guddoomiye, (2) Guddoomiye K/Xigeen iyo (3) Xoghaye. Hawsha Guddigu waxay noqonaysaa mas'uuliyad wadareed

Qodobka 3aad

Magacyada Xubnaha Guddiga

1	Cabdiraxmaan Macallin Cabbdullahi (Badiyow)
2	Maxamed Nuur Gacal
3	Aadan Cusmaan Xuseen
4	Maxamed Maxamud Gacma-Dheere
5	Cabdikaafi Maxamed Maxamuud
6	Xassan Maxamed Jimcaale
7	Amb. Cabdi Xaaji Liibaan (Dhabancad)
8	Faduma Axmed Caalin (Cureeji)
9	Cabdi Maxamed Jaamac
10	Mahad Aaden Guuleed
11	Cabbdullaahi Aadan Xaashi
12	Sahra Colaad Cabdi

Qodobka 4aad

Guddiga qabanqaabada Shirka Dib-u-Heshiisiinta Galmudug waxay u xil saaran yihiin xiriirkha beelaha, soo ururinta iyo isu keenidda ergooyinka beelaha ku matilaya shirwaynaha, daadihinta shirka iyo xaqijinta qaabkii xal waara looga gaari lahaa khilaafaadka bulsho iyo kuwa siyaasadeed ee ka dhix jira beelaha Galmudug.

Qodobka Saad

Guddiga waxaa la hawl gelaya xoghayn ka wakill ah Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dlb-u-Heshilinta oo si siman ula shaqayn doonta Guddiga qabanqaabada iyo Shirwaynaha labada.

Qodobka Gaad

Waajibaadka shaqo ee Guddiga qabanqaabada iyo Xoghaynta Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxaa lagu qeexa lifaaq gaar ah oo lala wadaagi doono guddiga iyo xoghaynta.

Wada Shaqayn Wacan iyo Guul Inshaa Allah

Cabdi Maxamed Sabrie,

Wasiirka Wasaaradda

(17/07/2019)

